Isboortiga

– waa bilaaw wanagsan nolosha

Isboortiga wuxuu siin dadka waaweеn iyo carruurta fursad ey xarakaad ku suubiyaan, ey isku dhaxgalaan iyo wax farxad ah u noqoto. In laga mid noqdo urur isboortig waxeey kuu noqon fursad aad saaxibo cusub ku yeelatid iyo aad bulshada ka mid noqonkartid. Carruurta iyo dhallinyarada waxeey u tahay fursad wanagsan ey nolosha ku bilaabikaran.

Isboortiga – waa doorasho wanagsan.

Warbixintaan waxeey ku saabsan tahay isboortiyaada Iswidhan kuwa ey yahiin iyo adiga iyo carruurtada sidaa uga qeyb qaadankartiin wadajirkaan.

U wada furanyahay bulshaada oo dhan

Iswidhan waxaa laga hela qiiyas ahaan 20 000 oo ah urur isboortiga. Ururada isboortiga qofkasto baa ka mid noqonkaro xubin. Wax yaabo badan baa arki karta, farxad baa la kulmi iyo wadjireen baa dareemi oo bulshada baa ka mid noqon.

In la furto urur ama ka mid noqontid urur waa xuquuq ku qoran sharciga wadanka Iswidhan u dagan. Dadka farxad iyo isla weyn bey dareemaan markey urur kamid yihiin. Laakin qasab ma han inaa qofkasto u sheegtid urur inaa kamid tahay. Qofka markuu rabo inuu kamid noqdo urur waxaa dhicikarto in lagu weeydiiyo tobankaada lambar. Sababta laguu weey diinaayo waxaa kamid ah ceymisha, oggolaanshada inaa tartaamo ka qeyb qaadan kartid iyo kaalmada dhaqaalaha, oo wax kale loo ma isticmaalaayo oo kabax san arrimaha ururka.

Dowlada ama degmada midna ma u taliyo isboortiga. Isboortiga waa dhaqdhaqaaqa ugu weeyn ey bulshada wadanka Iswidhan u taliyaan oo xubinada buu ku dhisan yahay.

Isboortiga wuxuu abuura isdhaxgalka

Dhamman bulshada weey ku soo wada dhaawankaran ururka isboortiga. Ahaaw gabar ama wiil, wadanka rabtid ka imaaw, diinta rabtid aamin sanow, ama kuma xirna shaqadaa ka shaqeeysid iyo meesha gurigaada ku yaalo. Xiisaha loo qabo isboortiga iyo rabitaanka in wax la isla abuuro buu ku dhisan yihiin ururada isboortiga. Isboortiga mideeda kale waa luqad la isku fahmo caalamka oo dhan: kubbadda cagta isku si baa loo dheela iswiidhsh ama seerbbi, bootinta hoose waa isku si iswaaxili ama iswiidhsh. Isboortiga bulshaada oo dhan buu quseeyaa, waa maaddo laga wada sheekeysankaro.

Ururada waxeey ku dhisanyahiin samafal ahaan

Ururada isboortiga waxeey ku dhisanyihiin bulshada oo samafal ahaan ka shaqeeyaan ururka ayaago munshaar ka raadineyn, oo dhowr jeer isbuuci oo badanaa fiidka. Dadkaas badanaa waa walidka dhalleen carruurta ururka isboortiga kamid ah, ama waxeey ahaan karan dad jecel isboortiga iyo ururka markaas ey taagersanyihiin.
Urur oo ku dhisnaankaro dhowr qof ma jiro oo xubinta dhammaan waa ey is wada caawiyaan, xubinta, walidiinta, dadka kale oo waaweeyn, dhallinyarada, in kuli dhamman iswada caawiyaan qofkasto inta tabartiisa ah.

Hoggaamiye rabitaan ku jiro

Isboortig wanagsan wuxuu u baahan yahay hoggaamiyaal bixinkaro tababar fiican, niyaad dhisitaan fiican iyo tusalo fiican u noqonkaran shabaabka. Hoggamiyaashas waqtigooda waxeey siiyaan carruurtooda iyo carruurta kale.

Isboortiga waa muhim

Iswidhan waxaa xoog looga aamin sanyahay in ururada isboortiga ey muhim yihiin. Sidaas daraadeed bey ururada badanaa kalmeen dhaqaalo uga helaan degmada iyo dowlada. Laakin badanaa kuma filna dhaqaalo kaalmadaas oo kharashka ku socdo oo sida sacadaha tababarka, waxbarashada hoggamiyaha, qalabka, tartamada, safarada iyo wixii la mid ah. Sidaas daraadeed waxey xubinada ururka haystaan ku iibinkaran waraqaha khamaarka, kafee, rooti ismaris ama wax la mid ah, iyo in sanadki halmar lacag qofka xubinka ururka bixiyo.

Xubinta baa go’aanka iska leh

Ururada samafalka ku dhisan waa dimugraadi. Ugu yaraan sanadkii halmar bey qabtaan kulanka sanadka, oo xubinta ururka oo bixiyeen lacagta xubinta ururka ka wada xaajoonaay-aan iyo go’aaminaayaan waxyaabahaa uu ururka qabandoono iyo sida lacagta loo isticmaali lahaa. Kulaankaas sanadka xubinkasto hal cod buu haystaa. Kulaankas baa adiga oo ah xubinka u codeeynkarta guddiga ururka. Guddiga baa mas’uul ka ah maamulka ururka ila kulanka sanadka kale. Guddiga baa xataa mas’uul in ururka ku dhaqmo sharciyada ururka, oo xubinta ururka go’aamiyeen sida ururka u shaqeynayo.

Ka qayb qaadashada waalidka aad bay muhiim u tahay

Si ay meelmar u noqoto hawlaha loo qabanayo carruurta iyo dhallinyarada waxaa lama huraan ah ka qayb qaadasha-da waalidiinta nolosha iyo hawlaha ururrada. Kaalinta waa-lidka waxay ahaan kartaa inay mararka qaarkood u raacaan ubadka ciyaaraha sida tan barafka, tan dabbaalashada ama tan duur u bixidda. Kaalintaasi aad bay muhiim ururrada ugu tahay, taasoo xubnuhu mushaar la´aan ku hawlgalaan waqtigay firaaqada yihiin.

Ka soo qeybgal isdhaxgalka isboortiga. Nala dareem farxada xarakaadka, ciiyaaraha iyo tartamada.

Iswidhan tajirin bey ka yahiin ururada isboortiga

Iswidhan waxaa ka heleysa ururo boqol sano jiro iyo kuwo dhawaan la aasaasay. Ayaado ku xirneen da'daada ururadaas waxeey kugu martiqaadayaan isboortiyo kala duwan. Waxaa helikarta isboortiyo shaqsiyaad iyo kuwa kooxda, isboortiyada xagaaga iyo jiilaalka.fursadaha aa kala doorankartid weey badanyahiin oo waxeey ku xirantahay canugaaga waxa uu xiiseeynaayo, tusale ahaan adkaysiigiisa, xaaladiisa guud caafimaadka, isku taxallujin ama xoogisa.

Ururada isboortiga badanaa qofka weey u oggalyahiin inuu tijaabiyo isboortiga inteysa dhihin lacagta xubinta ururka bixi. Sidaas daraaded carruurtaada gey meelaha lagu suubiyo isboortiyada magaladaada si ey u tijaabiyaan isboortiyada kala duwan.